Waxbarashada Tamarta

Ma doonaysaa in aad kashaqeysid shaqo masuuliyadeedu aad u weyntahay islamarkaana qaab isbedel shaqo leh?
Ma doonaysaa in aad ka shaqeysid, shaqooyin suaalahoodu maanta aad ay u mihiimyihiin ah inwax lagaqabto?
Ma doonaysaa in aad shirkad aad lahaadahay mustaqbalka?
Ma doonaysaa in aad shaqo raadsatid ka dib marka aad dhameysid waxbarashada dugsiga sare?
Ma doonaysaa in aad heshid fursad ah in aad shaqaysatid ama aad waxbarasho debeda ugu tegtid?
Haddaba waxbarashadan tamartu waa mid adiga ku gu haboon.

Waxbarashadan tamartu waxaa aad baran doontaa aasaas farsamadeedka tamarta,si markaa aad ku shaqeeysid, tusaale ahaan sida koronto yaqaan, dabdhaliye, farsamoyaqaanka qaboojiyaasha, farsamo yaqaanka matoorada hawadaqaada,badmaaxnimo iyo qasabad sameeye ama tuumbiiste. Sidaad halkanba aad kuaragtid waxa laga shaqeen karo aad ayeey u farabadan yihiin.Waxaanad helikartaa , haysataana fursad aad ku dalbatid waxa aad dooneysid in aad baratid kuna takhasuustid. Haddii tusaalo ahaan aad daawatid warbaahinta, tusaale ahaan sida,tiifiiyada ama aad akhrisid jaraa-idada waxa ay in ta badan ka hadlaan, ama ay qoraan waxa weeye tamarta, dabeecad ilaalitaanka, iyo wixii kale ee kugu xeeran. Intaas oo dhana wax aad ka heleysaa kuna jirtaana waxbarashada.

Waxa aad adiga iyo ardayga kula dhigta waxbarashada aad kafikirtiin sida farsamadu ay wax tar noogu yeelato, islamarkaana aanu u helno deegaano wanaagsan.

Waxbarashadan aad baranaysid ee kusaabsan tamarta waxa aad looga isticmaalaa dunida inteeda kale oo dhan.Haddii aad taqaanid luqadokale ama afafkale, islamarkaana aad xiiseeysid dhaqamada shisheeye ee kaladuwan, waxa markaa aad ka shaqeysankartaa meel kasta oo aad dooneysid in aad ka shaqeysatid.

In aad shaqeysid ama aad waxbarashadaada aad wadatid.

Haddii aad dooratid waxbarashadan ah tamarta, shaqo toos ah waadraad sankareysaa kadib marka aad ka qalinjabisid ama aad kabaxdid waxbarashada dugsigasare.Shaqooyinka aad raadsankareysid waxa ayku xidhantahay hadba takhasuska aad heysatid ee aad baratay.Waxaa mararka qaarkood suurtowda in aad tababar xirfadeed aad sameysid kaas oo noqon kara mudo sanad ama in kabadan.Waxaana lagu siin karaa lacagta tababar xirfadeedka,waxaana aad lashaqeen doontaa oo ku hagidoona dad xirfadan u howlgala unana yaqaan, kuwaas oo aad si weyn aad ka faa ideysandoontid aqoontooda iyo khibradooda, mudo aad u badana ka soo shaqeeyey shaqooyinkan.

Haddii aad dooneysid waxaad sii wadan kartaa waxbarashadaad, kadib marka aad dhameysid waxbarashada dugsigasare,waxaad doorankartaa waxbarasho aad xiiseenaysid, waxaanad ka dhigankartaa dugsiyada lagabarto xirfadaha kaladuwan.Haddii kalena wax barashadaada ayaad sii wadan kartaa ilaa iyo mid heer jaamacadeed. Haddii aad dalbatid waxbarashada

farsamada badmaaxnimada,waxa markaa aad waxbarasho kasii wadan kartaa dugsiga badmaaxnimada lagadhigto.

Shaqooyinka aad helikareysid.

Marka aad waxbarashadan tamarta aad qalinjabisid waxa aad kashaqeynkareysaa tusaalo ahaan sida farsamo yaqaan, matoorada, halwadeen ka matoorada,farsamo yaqaan, farsamoyaqaanka guryaha.

Haddii aad jeclaatid in aad waxbarshadaada aad sii wadatid kadib marka aad qalinjebisid waxbarashada dugsiga sare.Wax aad heli kareysaa oo aad raadsankartaa shaqooyin aad u farabadan oo aad u kaladuwan.Haddii aad iminkaba aaad ogtahay waxa aad dooneysid in aad kashaqeysid, waxa aad haddaba aad kala tashankartaa qofka xogogaalka u ah waxabarashooyinka iyo xirfadaha dugsiyada (studie och yrkesvägledare)isaga ama iyada ayaa kaa caawimi doona si aad u dooratid waxbarasho saxa ah ee leh takhasus hagaagsan.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantay

Waxbarashadan tamartu waxa ay ka koobantahay casharo.Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas.Waxaa jira laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada tamarta oo kaliya.Waxaa intaa sooraaca in ay jiran casharo kale oo aad adigu gaar u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay 3 takhasusood oo kaladuwan.Taas oo macnaheedu ay tahay ardayda dhamaan dhigata waxbarashadan tamarta ee kuna sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ay rabaan in ay ku takhasusaan.Waxaa laga yaabaa meelo qaarkood in ay jiraan takhasusooyin farabadan oo kala duwan. Kuwaas oo laga yaabo in ay adiga gaar ahaan kugu haboonyihiin.Waxaad weydiinkareysaa, kalan tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxa ka mid ah.

- Farsamoyaqaanka -waxa uu khuseeya adiga hadii aad doonayasid in aad ku shaqeeysid sida, farsamo yaqaanka dhismayaasha ama guryaha xaafada, kaalinta korontada, ama kaalinta kuleelka dhalisa, shaqeenta warshadaha, ama biyaha iyo farsamada dabeecada.(waxaa jira hal takhasuus oo gooniya oo laga dhigankaro Oskarshhamn, qofkasta oo doonayana wuu ka dhigan karaa).

- Farsamada badmaaxnimada- Waxa uu khuseeyaa adiga haddii aad dooneysid in aad ku shaqeeysid badmaaxnimo, kaas oo noqonkara in aad kashaqeysid maraakiibta gudahooda ama qololka matoorku yaalo.

- Farsamo yaqaanka duunbooyinka ama qasabadaha iyo qaboojiyo yaasha- Waxa uu khuseeyaa adiga haddii aad dooneysid in aad ku shaqeeysid, iskuxidh-xidhka ama

rakibaada,iyo dub u hagaajinta waxyaalaha jaba ee farsamada ah , unabaahana in dibuhabeen iyo dayactirlagusameeyo.

Xiidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashada tamarta waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada,waxa aad isku deyi kareysaa in aad shaqeysid. Waxaad kaloo aad heysataa ilaa iyo 15 isbuuc oh dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diridoona iskuulkaaga isaga oo markaas aywada shaqayn ay kadhaxeyso iskulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhawmeesha aad degen tahay.Waana habka ugu wanaagsan ee aad dadku barankartid, xidhiidhkaas oo aad markale aadkaga faa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqoraadso mustaqbalka.Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen Swiidhen, waxa markaas suurtogal ah in aad heshid fursadaas debeda ah.
Haddii aad dalbatid waxbarashadan ah farsamada badmaaxnimada, waa in aad ogsoonaataa kuna talagashaana in lagaaga baahanyahay warqadcaafimaad,marka aad sameenaysid dababar xirfadeedka.
Haddii aad ka shaqeynaysid dushasare ee markabka waa in aragtidaada indhuhu ey kalasaarikaraan midabada si aad u fiican. Qiyaastaada labada indhoodna waa in ay noqdaan oguyaraan 0.8, adigoon muraayad idhosidan marka aad wax eegeysid.
Haddii aad dooneysid intaa in aad waxka sii ogaatid laxidhiidh qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Aad ayaa loogu baahanyahay dad aqoon buuxda u leh, bartayna tamarta. Dadkeena bini aadanka ahi waxaynu u baahanahay tamaro, islamarkaana waa in wax laga bedeela tamaradii hore u jirijiray. Haddii aad shaqo aad ku heshay kadib marka aad ka qalinjabisid waxbarashada tamarta ah, wax ay haddaba ay ku xidhantahay hadba takhasuska aad qaadatay wax uu yahay, ama haddii aad doontid waxbarashadaada waad sii wadan kartaa.tusaale ahaan haddii aad dooneysid in aad ku shaqeysi farsamo yaqaanka biraha, markaa waxaa suurtoobikarta in aad shaqo aad heshid kadib marka aad dugsiga sare aad kabaxdid.
laakinse haddii aad noqotid injineer ama farsamayaqaan aqoon jaamacadeed leh waxaad u baahantahay in aad waxbarashadaada aad sii wadatid ilaa heer jaamacadeed, kadibna shaqooyin aayaad si fudud u helidoontaa.